

la xariirka ❖ Ombudsman

Waxaa laguugu dhiirigelinaa in aad la xariirtid Ombudsman waqti kasta oo aad dareentid in xafiiska Magaalada, xafiis ama shaqaale uu kugu sameeyay xaq darro.

⇒ **Khadka ashtakada:**

503-823-0144

⇒ **Email:**

ombudsman@portlandoregon.gov

⇒ **Ku soo dir boostada ama kaali:**

Office of the City Auditor
Office of the Ombudsman
1221 SW 4th Avenue
Rm 140
Portland, Oregon 97204

Si aad u heshid macluumaad:

www.portlandoregon.gov/auditor/ombudsman

Kala soco Twitter:
Portland_Ombuds



OpenCity Tipline

Ombudsman wuxuu kaloo maamulaa khadka ogeysiinta Xisaabiyaha *OpenCity* (kaasoo horay loo yaqaanay Khadka Digniinta Khayaanada).

Khadka Ogysiinta waa ilo loo sameeyay shaqaalaha dadweynaha iyo Magaalada si ay u soo sheegaan, iyaga oo magacooda sheegin, musuqmaasuqa la tuhunsan yahay, khayaanada, khasaarada, gafka loo isticmaalo mansabka, iyo/ama sida khaldan ee loo isticmaalo ilaha Magaalada.

Si loo gaarsiiyo warar:

Wac

1-866-342-4148

ama

Internetka

riix ***Khadka Ogeysiinta OpenCity*** ee laga helo
www.portlandoregon.gov/auditor/ombudsman



Magaalada **Port** land



Ombudsman

503-823-0144



sharaxaadda ❖ Ombudsman

om-buds-man
[om-buhdz-muhn]

1. qof madax banaan oo dhexdhexaad ah kana jawaaba ashtakooyinka dadweynaha ee ku saabsan adeegyada iyo dhaqanka dawladda;
2. qof si toosan, si aan rasmi ahayn, oo lagala tashto ashtakooyinka dadweynaha;
3. qof u dooda dawlad wanaagsan, caadil ah, oo ku shaqeyso xaqa.



kaalinta ❖ Ombudsman

Ombudsman wuxuu mas'uul ka yahay hubsashada in dhaqanka magaalada ku dhisan yahay xaqa, **macquul** kuna dhisan yahay **cadaalad**.

Ombudsman wuxuu u shaqeeyaa in la habsado xaqa, wuxuuna taas ku gaaraa:

- ✓ Bixinta macluumaad, kaalmo iyo xariirin
- ✓ Baarista ashtakooyinka
- ✓ Kala talinta siyaabaha lagu xalliyo ashtakooyinka la caddeyn karo
- ✓ Soo saaridda warbixin ku socota dadweynaha
- ✓ La socoshada iyo aqoonsiga sasaanka siistemka

xariirka ❖ Ombudsman

Xariirka wuxuu aad muhiim ugu yahay Ombudsman. Haddii aad dooneysid in Ombudsman uu tago shirka bulshada, tag xafiiskaada, ama dir qoraal laga helo macluumaad, la xariir (503) 823-0144.

xadka ❖ Ombudsman

Ombudsman ma soo faragelin karo ama ma baddali karo natiijadaha ka soo baxa dhageysiyada maamulka go'aanada maxkamadda.

Ombudsman shaqo kuma laha ashtakooyinka ka soo horjeeda wakaaladaha federaalka, gobolka, magaalada, ama dagmada.

Ombudsman shaqo kuma laha ashtakooyinka sida gaarka ah uga dhexeeyo dhinacyada gaarka ah.